# UGA WARBIXINTA DEMBIYADA FARAXUMAYNTA

# BOOLIISKA

Haddii aad go'aansato inaad u sheegto booliiska dembiga faraxumaynta, si ixtiraam, qadarin xushmayn leh ayaa laguula dhaqmayaa. Waxaad annaga naga filaysaa sida soo socota.

- **Samaqab, amaan iyo ixtiraam** | Samaqabkaaga iyo amaankaagu waa waxa noogu muhiimsan. Waanu ku dhegaysanaynaa annaga oo aan go'aamin arrintaada waxaana kuula dhaqmaynaa si leh qadarin, ixtiraam iyo sharfid. Waanu ixtiraamaynaa asalka dhaqankaaga iyo amniga shakhsiyeed iyo/ama baahida laga yaabo inaad qabto. Go'aanka ah in la qabto baaritaan rasmi ah ayaa lagaala hadli doonaa adiga aragtidaadana waa la ixtiraamayaa lana qadarinayaa.
- **Macluumaadka ku saabsan adeegyada kaalmada** | Waxaan ka wada hadli doonaa adiga baahidaada rasmiga ah iyo tan aan rasmiga ahayn. Waxaanu kuula shaqaynaynaa lamaane ahaan si loo xaqiijiyo inaad haysato kaalmo ku haboon oo la helayo iyada oo lagugu xirayo hay'adaha kaalmaynta dhibanaha dembiga.
- **Caawimada qofka kaalmada** | Waxaa laga yaabaa inaad hesho qof ku kaalmaynaya oo aad dooratay mudada aad nala macaamilayso. Waa muhiim in qofka ku kaalmaynayaa aanu ahayn markhaantiga kayska oo aanay faragelinayn baaritaanka booliiska.
- **Xiriirka booliiska dhexdiisa** | Baaritaankaaga waxaa gacanta ku haynaya baare takhasus leh kaas oo ah midkaad tooska ula xiriirayso oo asalka ah. Meesha lagala xiriirayo waxaa lagu qori karaa bogga 5aad ee qoraalkan.
- **Macluumaadka ku saabsan baaritaanka.** | Waxaanu kaala hadli doonaa sida aad u jeclaan lahayd in aan wax kuugu sheegno inta baaritaanku socdo waxaanuna kuula socodsiinaynaa sida lagu heshiiyey. Waxaan diyaar u nahay su'aalla kasta oo aad na weydiiso.
- **Daahisto marna ma saamaynayso inaad soo sheegto.** | Ma jiro waqti u go'an in la soo sheego dembiga faraxumaynta. Baarayaasha takhasuska ah waxaa loo tababaray inay baaraan dembiyada faraxumaynta, iyada oo aan ku xirnayn waqtigay arrintu dhacday.

## TUSMOOYINKA


| | |
|---|---|
| 1 | Wixii la xiriira qoraalkaan |
| 1 | Waa maxay dembiga faraxumayntu? |
| 2 | Uga warbixinta booliiska dembiyada faraxumaynta |
| 2 | Maxaa dhacaya haddii dembiga faraxumayntu dhacay muddo hore? |
| 2 | Sidee ugu warbixin karaa booliiska? |
| 2 | Macluumaadka samafalka iyo kaalmada |
| 2 | Muxuu noqonayaa baaristaanka booliisku? |
| 2 | Maxaa dhacaya haddii aanan doonayn in aan sii wado? |
| 2 | Duubista hadalkaaga |
| 3 | Baaritaanka caafimaadka Forensic-ga ah |
| 3 | Qaadista caddayn kale |
| 3 | Waraysi ka qaadida eedaysanaha |
| 3 | Baarista caddaynta |
| 3 | Aadida maxkamada iyo kaalmada markhaantiga |
| 3 | La xiriirida booliiska |
| 4 | Yaan kale oo aan la hadli karaa? |
| 5 | Qaamuuska yar ee erayada |


## WIXII LA XIRIIRA QORAALKAAN

Xaashidaani waxay sharxaysa waxa uu yahay dembiga faraxumayntu, waxaad filan karto haddii aad go'aansato inaad u sheegto booliiska dembiyada faraxumaynta, waxa dhacaya inta lagu jiro baaritaanka iyo maxkamada iyo xalalka caawimo ee la helli karo.

Eraybixinada qaarkood ee lagu isticmaalay xaashida waxaa laga yaabaa in aadan aqoon iyo markay jiraan isbedelo luqada ah ee ay isticmaalaan ururada iyo hay'adaha kala duwan. **Waxaad ka helli kartaa qaamuus yaraha bogga 5aad ee qoraalkaan.**

## WAA MAXAY DEMBIGA FARAXUMAYNTU?

### DEMBIGA FARAXUMAYNTU WUXUU DHACAA MARKA QOF AANU OGOLAAN FICIL GALMOOD AMA FICILO.

Dembiyada faraxumaynta la xiriira waxaa looga jeedi karaa dabeecadaha faraxumaynta kuwaas oo ka dhiga qof inuu dareemo xasilooni daro, cabsoodo ama la handadey ayna ku jiri karto kufsasho iyo xoogid iyo faraxumaynta ilmaha

Dembiyada faraxumaynta waxaa badanaa sameeya qof la yaqaan, ay aamineen, dhibanaha iyo kuwa u dhow. Dambiyada faraxumayntu waxay ka dhici karaan meel walba. Kani wuxuu noqon karaa qoyska dhexdiisa, bulshada iyo hay'adaha dhexdooda (sida dugsiga, kaniisada, naadiga, goobta lagu hayo dadka waaweyn ama adeega kuwa iinta leh). Dembiyada faraxumaynta waxay dhici karaan hal mar ama ku celcelin muddo dheer ah.

## UGA WARBIXINTA BOOLIISKA DEMBIYADA FARAXUMAYNTA

### UGA WARBIXINTA BOOLIISKA DEMBIGA FARAXUMAYNTA WAA TALAABO WAX KU OOLLA.

Waanu ku dhegaysanaynaa annaga oo aan go'aamin arrintaada waxaana kuula dhaqmaynaa si leh qadarin, ixtiraam iyo sharfid. Dembi baarayaashayadu waa dad leh takhasus waxaana loo tababaray inay fahmaan xaallada kala duwan oo qalafsan ee dembiyada faraxumaynta.

Uma baahnid inaad ka welwesho haddii waxa kugu dhacay adiga yihiin gaf dembiyeed ama aanay ahayn. Waa annaga shaqadayada in aan ogaano. Haddii aad welwel ka qabto wax ku saabsan wixii kugu dhacay adiga, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad la hadasho mid ka mid ah kooxda baarista dembiyada faraxumaynta iyo baarista dhibaataynta Carruurta (SOCITs) ama ciidanka Sano. **Waxaad ka helli kartaa faahfaahinta meesha lagala xiriirayo SOCITs iyo ciidanka Sano bogga 3aad.**

Inaad noo sheegto waxa kugu dhacay macneheedu maaha kayskaagu horay ayuu ka aadayaa maxkamada. waanu kaala hadli doonaa xalalkaaga aragtidaadana waa la qadarinayaa waxaana la siinayaa mudnaanteeda.

Waanu fahamnay inay adkaan karto inaad nooga warbixiso waaya-aragnimadaada. Waxaa jira hay'ado kaalmo oo ku kaalmayn kara iyada oo aan ku xirnayn go'aankaaga ah inaad booliiska u sheegto. **Waxaad ka helli kartaa liiskooda bogga 4aad.**

### NOOC KASTA OO DEMBIYEED FARAXUMAYN AHI WAA WAX AAD U XUN. QOF WALBAA WUXUU MUDAN YAHAY XAFIDAAD SIDA WAAFAQSAN QAANUUNKA.

## MAXAA DHACAYA HADDII DEMBIGA FARAXUMAYNTU DHACAY MUDDO HORE?

### MARNA MA NOQONAYSA WAX DAAHSAN KA WARBIXINTA DEMBIAG FARAXUMAYNTU.

Go'aan ka gaarida ka warbixinta dembiga faraxumaynta sanada ka dib waa wax badanaa dhaca. Waan fahamnay in dadka badankiis ay soo marto dembiyo faraxumayn ah inay gadaal u dhigaan inay qofna u sheegaan amaba aanay marna cid u sheegin.

Kuma xirna in dembigu dhacay saacado, asbuucyo, biloh, sanado ama tobanaal sani ka hor. Dembibaarayaashayada ama baari doona.

Waxaanu kugu dhiirgelinaynaa inaad sheegto iyada oo aan ku xirnayn marka dembiga faraxumayntu dhacay ama xataa haddii aad ogtahay ama aadan ogayn in qofku aad eedaynaysaa shintay.

### SIDEE UGU WARBIXIN KARAA BOOLIISKA?

Dembi baarayaasha Dembiyada Faraxumaynta iyo Kooxda Baarista Dhibaataynta Ilmaha (SOCITs) iyo Kooxda Sano ayaa si khaasa loogu tababaray inay baaraan dembiga faraxumaynta.

Si aad ugu warbixiso dembiga faraxumayta booliiska:

- Wac SOCIT (bogga 3aad wixii faahfaahin ah)
- Tag saldhiga booliiska agtaad ah (gal websaytka **police.vic.gov.au/location** wixii faahfaahin ah)
- Wac saddex eber (**000**) wixii degdeg ah.

Ka warbixi dhibta faraxumaynta ilmaha (wixii taariikh ah ama hadda ah) kaas oo ka dhacay goobaha diimaha macaahida ayaa waxaa sheegi karaa kooxda baarista Sano iyada oo laga wacayo:

- tel: **1800 110 007**
- email ugu dir **sanotaskforce@police.vic.gov.au**

Haddii aadan diyaar ahayn, waxaad la xiriri kartaa xarunta Centre Against Sexual Assault (CASA) si aad ula hadasho talo-bixiye. **Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan CASA iyo adeegyada kale ee kaalmaynta ee la helli karo, ka eeg bogga 4 aad.**

## MACLUUMAADKA SAMAFALKA IYO KAALMADA

Dembi baare iyo talabixiyaha CASA ayaa kula shaqayn doona si loo xaqiijiyo inaad hesho kaalmooyinka ku haboon.

Waxaanu ku siin doonaa macluumaadka ku saabsan adeegyada kaalmada oo aad ku helli karto lacag la'aan. Adeegyadaas waxaa ka mid ah:

- Talasiin iyo kaalmayn muddo gaaban, dhexe iyo muddo dheer
- Caawimo daaweyn ah iyo dabagalka daaweynta
- Macluumaad iyo kaalmo inta lagu jiro baarista iyo habka socodka maxkamada
- Gurisiinta Degdegt ah
- Kaalmada iyo Caawimada Dhibanayaasha Dembiga ee Dalabyada Maxkamada
- Macluumaadka iyo talasiinta qoyska, saaxiibada iyo shaksiyaadka kaalmada.

**Macluumaadka ku saabsan adeegyada kaalmada oo aad helli karto waxaa lagu bixiyey bogga 4aad.** Adeegyadaas ayaad helli kartaa iyada oo aan ku xirnayn go'aankaaga si aad booliis ugu sheegto.

## MUXUU NOQONAYAA BAARISTAANKA BOOLIISKU?

### BAARITAANADA DEMBIYADA FARAXUMAYNTA WAXAA SAMEEYA BAARAYAAL KU TAKHASUSAY.

Baaritaankaaga waxaa hogaamin doona dembi baare kaas oo noqonaya qofka aad kala xiriirayso.

Waanu ku sheegi doonaa horumarka inta lagu jiro baaritaanka waana na heli kartaa su'aalla ama welwel oo aad qabto. Waan ka wada hadli karaa si aad u rabto in lagula socodsiiyo inta baaritaanku socdo - qoraal ahaan, telefoon, email ama shakhsi ahaan. Haddii aad jeclaan lahayd in aan wax lagula socodsiin, noo sheeg, ama na weydiiso in aan la socodsiino geedi socodka warbixintaada qofka ku kaalmaynaya.

Waxaa jira heerar badan oo baaritaanka booliiska kuwaas oo ay jiraan duubitaanka qoraalkaaga iyo ururinta baarusta caddayntaada. **Macluumaad intaa ska badan oo waxa ay ku lug leeyihiin baaritaan ahaan ayaa lagu bixiyey boggaga 2-3.**

## MAXAA DHACAYA HADDII AANAN DOONAYN IN AAN SII WADO?

Waanu kugu dhiirgelinaynaa waana ku kaalmaynaynaa inta baaritaanku socdo. Si kastaba, waanu kugu dhiirigelinaynaa oo kugu kaalmaynaynaa inta baaritaanku socdo. Si kasta ha ahaatee, waanu fahamnay in lag ayaabo inaad go'aan ku gaarto si wadida baaritaanka ee booliisku in aanu xal fiican kuu ahayn.

Go'aansiga in aadan sii wadin kaa joojin mayso in aad mar dambe sii wado. Si kasta, dib dhaca baaritaanku wuxuu keeni karaa in cadaymaha qaarkood lumaan. Marka ay jirto khatar amaanka bulshada ah, waxaa laga yaabaa in aan u baahano in aan sii wadno baaritaanka.

Iyada oo aan ku xirnayn go'aankaaga, amaankaaga iyo samaqabkaaga ayaa ah mudnaantayada waana kula shaqaynaynaa si aan kuugu xirno adeegayad akaalmada.

## DUUBISTA HADALKAAGA

### QAYBTA UGU MUHIIMSAN EE BAARITAANKA WAA IN BOOLIISKU QAATO CADDAYNTAADA.

Caadatan waxaanu qaadan doona caddayntaada heerka ugu horreeya ee baaritaanka si gaara. Duubida cadaymaha wixii aad xasuusato oo ku saabsan wixii kugu dhacay si karaankaag ah oo suurtagal ah. Waxaanu ku weydiin doona wax kasta oo aad xasuusato oo ku saabsan, kuwaas oo ay ku jiraan dhawaaqa, urka, sidaad u dareentay wixii aad samaysay. Isku day in aadan waxba ka tegin. Xataa tafaasiil yar oo laga yaabo in aadan muhiim u arag ayaa caawimi karta baaritaankayaga.

Waan ognahay in hadda ka hadalka faraxumayntii uu yahay wax qalafsan. Maaha wax sahlan in aad nala wadaagto macluumaad shakhsiyeed iyo mid jir ahaan gaar ah. Baarayaashayadu si Sharaf leh ayay u sharaftaada. Waxaa loo tababaray inay fahmaan saamaynta faraxumaynta waana ku caawimaynaa inta baaritaanku socdo. Waxaa kaloo laga yaabaa inaad hesho qof ku kaalmeeya oo jooga xagga shucuurta.

Qaado waqtiga aad u baahan tahay si aad u samayso caddaynta. Waa muhiim in aad dareento qanacsanaan markaad bixinayso caddaynta. Bixinta cadayntaada waxaa laga yaabaa inay qaadato dhowr saacadood ama mararka qaarkood howr balan.

Waxaa lagu siin doona koobiga caddayntaada markaad dhamayso. Haddii aad xasuusato mar dambe wax ama hesho qalad caddaynta ka muuqdas, la hadal baaraha kayska gacanta ku haya.

## BAARITAANKA CAAFIMAADKA FORENSIC-GA AH

### FARAXUMAYNTU BADANAA LUG KUMA LEH DHAAWAC JIREED.

Iyada oo ku xiran xaallada warbixintaada iyo mudada ay qaadanayso, waxaa laga yaabaa in lagugu sameeyo baaritaanka. Haddii baaritaanka caafimaadka forensic ku haboon yahay, waanu kuu sharxi doona waxay ku lug yeelanayso waxaana kuu qaban qaabin doona talasiin haddii aad ogolaato.

Haddaad samaynayso baaritaanka caafimaadka forensic aday kuu taallaa, si kastaba la soco in caddayntu lumi karto mudada dheer.

Baaritaank caafimaadka forensic waxaa sameeya mihnadle caafimaad oo tababar qaba kaas oo wax ka qabanay baahida caafimaad ee dedgegta ah, uririnaya caddaynta si loogu isticmaalo baaritaanka, waxaa laga yaabaa in sawira la qaado wixii dhaawac ah waana kaala hadli doona wixii welwel ah oo aad qabto oo la xiriira infakshanada galmoodka la isugu gudbin karo ama uurka. Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay talabixiyaha CASA iyo/ama qof kaalmeeyey ah inta baaritaanku socdo.

**Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan baaritaanka caafimaadka forensic, fadlan booqo websaytka Victorian Institute of Forensic Medicine website at** vifm.org

## QAADISTA CADDAYN KALE

Waxaanu qaadi doonaa caddaynta la xiriirta dembiga. Wixii aanu u ururino caddayn ahaan waxay ku xirnaan doontaa xaalka faraxumaynta.

Caddaynta la ururiyey inta baaritaanku socdo waxaa loo haynayaa si amaana wax walba oo ka mid ah oo caddayn ahaan loo qaadayna waa la doonaa inta loo baahan yahay. Dhamaystirka habkaan, waxaanu kaala hadli doona qaybaha aad jeclaan lahayd in la soo celiyo.

Waxaanu ka qaadi doona caddaymo dadka markhaantiga ka ahaa faraxumaynta ama awoodi kara inay macluumaad bixiyaan kaas oo caawimi kara baarista. Waan fahamnay in aad ka biya-diidi karto in baarayaashu la hadlaan qoyskaaga iyo saaxiibadaa.

Waanu ixtiraamaynaa barayfasigaaga mana muujinayno wixii macluumaad ah oo aan muhiim ahayn markaan la hadlayno markhaantiyada. Haddii aad dareen ka qabto ama ka welwelsan tahay qof uun oo laga in aan la hadalay, noo sheeg si aan uga wada hadalo welwelkaaga.

## WARAYSI KA QAADIDA EEDAYSANAHA

Haddii eedaysanaha la ogyahay ama la carab-baabay, waxaa laga yaabaa in aan waraysano.

Iyada oo ku xiran xaalladaha, qofka la soo eedeeyey waxaa laga yaabaa in lagu hayo xabsiga, la sii daayey ama la siiyey damaanad ilaa maxkamadu bilaabato.

Amaankaaga ayaa ah mudnaantayada heer kasta oo barista ah. Waanu kula socodsiin doona waana kaala hadli doona sida loo maaraynayo amaankaaga.

## BAARISTA CADDAYNTA

Gabagabada baaritaanka, dhamaan cadaymaha la ururiyey ayaa waxaa baari doona si gaara loo tababaray in uu go'aan ka gaaro arrimaha maxkamada aadaya. Go'aanka waxaa la samaynayaa ka dib marka lagu sameeyo qadarin taxadar leh caddaynta la hayo ee shuruucda qaanuunka.

### BAARITAANADA OO DHAN LAMA GEYNAYO MAXKAMADA.

Tan macneheedu maaha in aanaan ku aaminsanayn. Keliya waa ma hayno caddayn si wax looga qabto heerka loo baahan yahay in lagu maxkamadeeyo. Haddii taasi dhacdo sida wax looga qabanayo waanu kaala hadlaynaa wixii arrintaas ku saabsan waxaana sharxaynaa sababta ay sidaas u nooqotay.

## AADIDA MAXKAMADA IYO KAALMADA MARKHAANTIGA

Haddii arrintu maxkamad aado, baare ama xeer ilaaliye ayaa kuugu sharxi doona si joogto ah kuna wargelin doona. Waxaa jira heerar badan oo maxkamadeed kuwaasina way kala duwan yihiin iyada oo ku xiran maxkamada kayskaaga lagu dhegaysanayo.

Waxaa jira qaaba kala duwan maxkamada kuwaas oo loogu talagalay in hoos loogu dhigo rafaadka. Kuwaas waxaa ku jira ka bixinta caddaynta goob kale oo closedcircuit television, iyada oo la isticmaalayo iskiriinada maxkamada si loo xaqiijiyo in eedaysanuhu aanu kuugu muuqan una ogolaanaya in qofka kaalmaynayaa kula joogo markaad bixinayso caddaynta.

**Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan aadida maxkamada, fadlan booqo websaytka Wasaarada Cadaalada iyo Amniga Bulshada oo ah** victimsofcrime.vic.gov.au

Waxaa jira dhowr adeeg oo aad helli kartaan adiga iyo qoyskaaga laydiinka caawimo maxkamada, sida Adeega Caawimada Makhaantiga ee Xafiiska Ciqaabta Dadweynaha. Waxaan samayn karaa xawilida adeegyada kaalmada takhasuska ah hadii loo baahdo.

**Macluumaad intaas ka badan, fadlan booqo websaytka Adeega Caawimada Markhaantiga.** victimsandwitnesses.opp.vic.gov.au

## LA XIRIIRIDA BOOLIISKA

### KOOXAHA BAARISTA FARAXUMAYNTA IYO DHIBAATAYNTA ILMAHA (SOCIT)

Waxaad u warbixin kartaa faraxumaynta SOCITs. Waxaan leenahay SOCITs ku yaalla Fiktooriya oo dhan.

Goobaha SOCIT telefoonadooda waxaa laga hellaa boggag soo socda. Goobaha waxaa loo qaybiyey qaybaha magaalada si laguugu sahlo inaad ka hesho agtaada unuga kuugu dhow.

### CIIDANKA SANO

CIIDANKA SANO waxay ku yaalliin Melbourne laakiin waxay ka hawl galaan Gobolka oo dhan. Waxaad u soo sheegi kartaa Ciiwanka Sano faraxumaynta ilmaha (wax waqti hore ama hadda dhacay) kuwaas oo ka dhacay goobaha diinta ama meelaha dadka lagu hayo.

**Wixii deg deg ah wac saddex eber (000).**

### KOOXAHA BAARISTA FARAXUMAYNTA IYO DHIBAATAYNTA ILMAHA (SOCIT)

**North-West Metropolitan**
**Mernda** (03) 9216 1310
**Fawkner** (03) 9355 6100
**Brimbank** (03) 9313 3460
**Melbourne** (03) 8690 4056
**Westgate** (03) 9216 0566

**Galbeedka Victoria**
**Ballarat** (03) 5336 6055
**Central Victoria (Bendigo)** (03) 5444 6752
**Colac** (03) 5230 0044
**Geelong** (03) 5246 8100
**Horsham** (03) 5382 9241
**Ararat** (03) 5355 1500
**Mildura** (03) 5023 5980
**Swan Hill** (03) 5036 1600
**Warrnambool** (03) 5560 1333

**Koonfurta Magaalada**
**Dandenong** (03) 8769 2200
**Seaford** (03) 8770 1000
**Bayside** (03) 8530 5100

**Bariga Victoria**
**Bairnsdale** (03) 5150 2677
**Benalla** (03) 5760 0200
**Box Hill** (03) 8892 3292
**Knox** (03) 9881 7939
**Central Gippsland (Morwell)** (03) 5120 0300
**Sale** (03) 5142 2200
**Seymour** (03) 5735 0208
**Shepparton** (03) 5820 5878
**Wangaratta** (03) 5723 0848
**Wodonga** (02) 6049 2672

### CIIDANKA SANO

1800 110 007
sanotaskforce@police.vic.gov.au

# YAAN KALE OO AAN LA HADLI KARAA?

Waxaa jira dhowr urur oo madaxbanaan oo ah Booliiska Fiktooriya kuwaas oo aad kala xiriiri karto wixii macluumaad ah iyo wixii kaalmo ah. Ururadaani way ku kaalmayn karaan iyada oon ku xirnayn go'aankaaga in aad booliiska u sheegtay.

### XARUMAHA LIDKA FARAXUMAYNTA

1800 806 292

casa.org.au

Xarumaha lidka faraxumaynta waxay siiyaan talasiin lacag la'aana iyo kaalmo dumarka, carruurta iyo ragga kuwaas oo ah ka soo badbaadayaasha faraxumaynta. Si aad u hesho CASA-da kuugu dhow inta shaqada lagu jiro wac 1800 806 292.

### KHADKA FARAXUMAYNTA EE SAACADAHA SHAQADA KA DIB

1800 806 292

casa.org.au

Khadka Faraxumaynta saacadaha shaqada ka dib waxay ka siiyaan talasiin iyo kaalmo dhamaan dhibanayaasha/badbaadayaasha faraxumaynta waqti uun oo nolsohooda ka mid ah waxayna ku xiriiriyaan shaqada ka dib wixii la qabtay CASA dadka cusub oo ah dhibanayaal/ka soo badbaadayaasha faraxumaynta. Waxay shaqeeyaan inta u dhexaysa 5ta maqribkii ilaa 9ka subaxii maalmaha Sabtida iyo Axada iyo maalmaha fasaxa.

### FARAXUMAYNTA QARANKA, ADEEGA TALASIINTA RABSHADA GURIGA QOYSKA

1800 737 732 (1800RESPECT)

1800RESPECT.org.au

Faraxumaynta Qaranka, Adeega Ka-talasiinta Rabshada Guriga Qoyska, waa 24ka saac, 7da berri ee asbuuca telefoonka qaranka iyo adeega talasiinta online-ka ah ee dhibanayaasha/ka soo soo badbaadayaasha rabshada qoyska. Waxay siiyaan mutarjum iyo adeega afka lagula hadlo (Auslan) dadka aan wax maqal.

### TALAABOOYINKA AMAANKA AH

1800 015 188

safesteps.org.au

Talaabooyinka Amaanka Ah waa adeeg dawlad goboleedka oo dhan ah ee dumarka iyo carruurta ay ku dhacday rabshad iyo dhibaatayn kaga timid ninkeeda ama nin horay u qabay, xubin kale oo qoyska ka tirsan ama qof u dhow. Waxay siiyaan adeegyo kaalmo oo ballaaran oo kala duwan si loogu suurtageliyo dumarka iyo carruurta inay noqdaan kuwa ka madax banaan rabshada. Dumar ay haysato rabshad guriga ayaa wici kara 24ka saacadood 7da berri ee asbuuca waxayna si kalsooniyi ku jirto ula hadlaan dumar kale wixii macluumaad ah oo ku saabsan adeegyada kaalmada rabshada qoyska, xuquuqda sharciga iyo xalka gurisiinta.

### XARUNTA DHAQAMADA KALA DUWAN EE LIDKA RABSHADA QOYSKA EE inTOUCH

03 9413 6500

intouch.org.au

inTouch waa adeeg qoys oo takhasus ah kaas oo bixiya kaalmo dhaqan ahaan waxqabad ah ee dumarka ka soo jeeda qaxootiga iyo soogalootiga kuwaas oo ay ku dhacday rabshad qoys. Adeegu waa lacag la'aan wuxuuna qarsoodi u yahay dumarka ku nool Fiktooriya oo jira 18 sano iyo wixii ka weyn. Dumarka ay haysato rabshada qoyska ayaa la xiriiri kara inTouch tel: 1800 755 988 (qiimaha goobta) inta u dhexaysa 9ka ilaa 5ta galabtii, Isniinta ilaa Jimcaha.

### WASAARADA CADAALADA IYO AMNIGA BULSHADA

1800 819 817

0427 767 891 (Qoraal)

victimsofcrime.vic.gov.au

Wasaarada Cadaalada iyo Amniga Bulshada ayaa bixiya macluumaad lacag la'aana iyo kaalmo 7da berri ee asbuuca inta u dhexaysa 8 subaxii iyo 11 habeenkii. Waxay bixiyaan macluumaad iyo talo ku saabsan ka warbixinta dembiga wixii ku saabsan xuquuqdaada, talaabooyinka maxkamada iyo adeegyada kale oo ku caawimi kara. Waxay kaloo kaa caawimi karaan dalbashada magdhow iyo caawima dhaqaale.

### MASHRUUCA QARANKA EE DIB-U-SIXIDA

1800 737 377

nationalredress.gov.au

Mashruuca Dib-u-sixida Qaranka wuxuu siiyaa kaalmo dadka ay soo martay faraxumayn ka timid hay'adaha diinta ama kuwa cilmaaniga ah. Mashruucu wuxuu caawimaa dadka ay kaga soo dhacday goobaha kor ku xusan faraxumayn si ay u hellaan talsiin, wax ka qabasho toos ah goobaha diiniga ama cilmaaniga ah lacag dhaqaale garqaadasho. Mashruuca Dib-u-sixida Qaranka waxaa lala xiriiri karaa Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhexaysa 8subaxii iyo 5galabtii. Faahfaahinta adeeg kaalmo oo lacag la'aana qaarsoodina ah ayaa iyagana laga hellaa nationalredress.gov.au/support ama adiga oo wacaya nambarka kor ku yaalla.

### XAFIISKA QAREENKA DADWEYNAHA

1300 309 337

publicadvocate.vic.gov.au

Xafiiska Qareenka Dadweynaha wuxuu u doodaa oo kor u qaadaa oo ilaaliyaa xuquuqda dadka iinta qaba. Adeega taladu wuxuu siiyaa talo aqoon ku salaysan iyo macluumaad dadka iinta qaba, qoysaska, daryeellayaasha, aqoon yahanada samafalka iyo caafimaadka, kooxaha kale ee daneeya arrimaha daryeelka, maamulka, awooda qareenka, ogolaanshaha daawada iyo awooda u hadlida. Adeega talada waa lala xiriiri karaa waqtiga shaqada. Waqtiga shaqada ka dib waxaa la helli Sarkaal shaqaynaya si loo siiyo talo degdeg ah wixii ka dambeeya saacadaha shaqada.

### ADEEGA SHARCIGA DUMARKA VICTORIA

03 8622 0600 (Magaalada dhexdeeda)

1800 133 302 (Ka baxsan magaalada)

womenslegal.org.au

Adeega Dumarka ee Sharciga wuxuu caawimaa dumar ay haysato dhibaato kuwaas oo wajahaya arrima sharci oo ay keentay guurkii oo ka burburay iyo rabshad. Way kaa caawimi karaan arrimah ay ka mid yihiin rabshada qoyska iyo amarada faragelinta amaanka shakhsiyeed, masuuliyada ilmaha iyo ka warhayntiisa, kala tegida iyo furiinka iyo dalabyada dhibanayaasha. Talada dhaqaale ayaa iyadana waxaa heli kara dumarka ay haysato dhibta deynta, dhaqaala xumada ama helitaanka waxay xaq u leeyihiin ka guurka burburay ka dib.

### MADAXA ESAFETY

esafety.gov.au/key-issues/image-based-abuse

eSafety waxay kaa caawimi karaan xayuubinta muuqaalada ama fiidiyowga, xaalladaha qaarkoodna, talaabo sharciya ka qaadida muuqaalo ama fiidiyow la qaaday iyada oo aan raali qofku ka ahayn

## QAAMUUSKA YAR EE ERAYADA

### La eedeeyey
Erayga loo isticmaalay qoraalkaan si loogu sharxo qofka lagu eedaynayo inuu galay dembiga. Waxaa kaloo laga yaaba in loo arko qofka laga shakisan yahay, qofka gafay, qofka difaacaya, qofka ka jawaabaya ama rabshad wade waxayna ku xiran tahay erayga la isticmaalayo.

### Dembi baare
Sarkaal booliis ah oo si khaasa loo tababaray kaas oo baara faraxumaynta, dhibaataynta ilmaha iyo dembiyada kale.

### Baaritaanka caafimaadka Forensic-ga ah
Baaritaan daawo oo ugu horrayn lagu eegayo, laguna qiimaynayo, diiwaangelinta iyo sharxida dhaawaca dhacay. Waxaana qabta qof tababaran oo loogu yeero Forensic Medical Officer ama Forensic Nurse Examiner.

### Xafiiska Qareenka Dadweynaha
Xafiiska garyaqaanka oo ciqaabmariyaha kaysaska waaweyn ee dembiga isaga wakiil ka ah Agaasimaha Qareenka Dadweynaha. Waa hay'ad gaara oo Booliiska Fiktooriya.

### CIIDANKA SANO
Unug takhasus ah oo ka mid ah Booliiska Fiktooriya kaas oo baara warbixinada faraxumaynta ilmaha ( oo hadda dhacday ama waqti hore) oo ka dhacay goobaha diimeed ama maamul.

### Faraxumayn
Xaallada badan oo kala duwan oo galmood aan raali la isaga ahayn. Kuwaas waxaa ku jira kufsi, faraxumayn iyo faraxumayn ilmood.

### Kooxda Faraxumaytan iyo baarista dhibaataynta Ilmaha (SOCITs)
Koox takhasus ah oo baarayaal ah kuwaas oo baara faraxumaynta iyo dhibaataynta ilmaha.

### Caddayn
Faahfaahin qeexan oo xaqiiqa ah iyo munaasabado uu markhaanti ka ahaa qof lug ku lahaa dembiga. Badanaa waa qoran tahay laakiin mararka qaarkood wuxuu noqon karaa fiidiyow la duubay.

### Hay'ada kaalmada iyo adeega
Urur, ka baxsan Booliiska Fiktooriya, ayaa bixinaya kaalmo samafaleed iyo adeeg caawimo sida talasiinta, macluumaadka ku saabsan baarista socodka maxkamada, caawimada daawada iyo gurisiin degdeg ah.

### Kaalmada Shakhsiyeed
Qofka bixiya kaalmada shucuureed inta ay socoto baaristu. Waxay noqon karaan saaxiib, xubin qoyska ka mid ah ama shaqaale ama tabaruce ka socda adeega kaalmada. Qofkani kama noqon karo markhaanti dembiga mana aha inuu farageliyo baaritaanka booliiska.

**DEMBI BAARE:**

## BIXINTA ARAGTIDA

Haddii aad aaminsan tahay in booliiska aanay si fiican kuula dhaqmin ama ku siin macluumaad sax ah, waxaad samayn kartaa dacwad adigoo:

- La xiriiraya booliiska agtaada ah (gal **police.vic.gov.au/location** for details)
- Emailing **complaints@police.vic.gov.au**

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso aragti ku saabsan adeeg lagu siiyey, u dir email **compliments@police.vic.gov.au**

### Aqoonsiga Kuwa Dhaqan ahaan u leh
Victoria Police waxay siinayaan kuwa dhaqan ahaan u leh dhulka aan ku nool nahay kana shaqayno.

Waxaanu ixtiraamnaa Dadka waayeelka ah iyo dhamaan Aborigines iyo dadka Torres Strait Islander kuwaas oo sii waday daryeelida dalkooda, dhaqankooda iyo dadkooda.

Waxaa ansixiyey oo daabacay Victoria Police
Victoria Police Centre
PO Box 913, Melbourne VIC 3001

Waxaa daabacay Victoria Police Febraayo, 2020

© The State of Victoria, Victoria Police 2020

Daabacado waxay leedahay xuquuq daabacadeed. Qaybna lama soo saari karo sina sida waafaqsan qodobada xeerka *Daabacada ee 1968*.

VICTORIA POLICE